

# The Schools St. Paul Ardeydu way u qalmaan

## *Waa maxay sababta ay bareyaashu diyaar ugu yihiin inay shaqo joojin ugu sameeyaan iyaga dartood*

Haddii labadii sano ee la soo dhaafay ay wax uun ina bareen, ardaydeenu waxay u baahan yihiin taageero dheeraad ah. Maadaama miisaaniyada dugsiga ay ka buuxdo lacagta doolarka fedraalka ee loogu talo-galey deeqaha lagula tacaalo cudurka COVID-19, hadda waxaa lasoo gaaray markii la dejin lahaa heshiis qandaraas oo lala galo fadareeshinka Barayaasha Saint Paul ee maalgeliya ardayda kaasoo sharfaya shaqada barayaashayada.

### ***Mudnaanaha ugu sarreeya ee SPFE waxa ku jira:***

- Xajmiga fasallada yaryar si ay ardayda ugu suurtagasho inay si shakhsi ahaaneed diiradda u saaraan waxbarashada
- Kordhinta shaqaalaynta kooxaha caafimaadka dhimirka ee dugsi kasta – gaar ahaan khubarada cilmi-nafsiga, khabiirada faragelinta iyo shaqaalaha qaabbilsan arrimaha bulshada.
- Dad qaan-gaar ah oo dheeraad ah kuwaasoo la shaqeeya ardaydeena qaba baahiyaha gaarka ah si ay u helaan taageero dheeraad ah oo fool ka fool ah.
- Abuuritaanka jawiyo dugsi oo dhaqan ahaan xaqiijinaya in dhammaan ardayda, iyada oo aan loo eegin waxa ay u eg yihiin ama inta lacag ee qoyskoodu sameeyo, ay si siman u horumaraan isla mar ahaantaana guulaystaan. Tan waxaa ka mid ah shaqaaleysiinta caawiyayaasha waxbarashada laba-luqadlayaasha ah oo badan si ay suurtagal u noqoto inaan si wanaagsan ula xiriirno qoysaskeena, kordhinta tababbarka ka-hortagga cunsuriyadda iyo taageerada barayaasha iyo in waxa aan baraneyno lagu saleeyo caddaaladda jinsiyadda .
- Mushahar cadaalad ah oo macquul ah kaasoo ku kacaya qiimaha-nololeed ee barayaashayada, gaar ahaan kaaliyayaashayada waxbarashada iyo shaqaalaha qaabbilsan taageerada, si ay ugu sii jiraan xirfadda.

***U sheeg Kormeeraha Guud Joe Gothard inuu xalliyo qandaraas suurtagelinaya maalgelinta ardayda iyo barayaasha si ay suurtagal u noqoto inay ka fogaadaan shaqo joojinta!***



SAINT PAUL FEDERATION  
OF EDUCATORS LOCAL 28

